

Jamhuriyadda Federalka Soomaaliya
Wasaaradda Gargaarka iyo
Maareynta Musiibooyinka



جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الشؤون الإنسانية وإدارة الكوارث

Federal Republic of Somalia
Ministry of Humanitarian Affairs and Disaster Management
The National Multi-Hazard Early Warning Center

DIGNIIN!!

Dabeylaha xagaaga oo xawaarhooda sare u kacay ayay suurta-gal tahay in ay waxyeello hantiyeed ka geeystaan degaannada dhaca xeebaha ee goballada Jubbooyinka iyo Shabeellada Hoose.

MUQDISHO, Soomaaliya, Sabti, 18^{KA} July 2020 – Dabeeyshan oo ka soo bilaabatay jihada koofureed ee gobalka jubbada hoose kuna socota xawaare u dhexeeya 30-45 KM/h ayaa ku waajahan jihada woqooyi bari ee dalka waxeyna ku socotaa dhinaca dhulka dhaca xeebta ee u dhexeeya labada jiho.

Saameynta dabeysaha xagaaga ayey la saadaalinayaa in ay bilaabanto saacadaha soo socda iyadoo halista ugu bandanna ay waajahayaan degmooyinka kala ah Kismaayo, Af-madoow, Jamaame, Badhaadhe, Marka, Baraawe iyo degaanno kale oo kamid ah dalka.

Cabsida ugu weyn ayaa ah in ay dabeylahani sababaan bur bur hantiyeed sida guryaha deggaannada xeebta ah iyo doonyaha kalluumeysatada, sidaas darteed, Xarunta Qaran ee ka Digista Halis-wadareedka waxey bulshooyinka ku nool deggaannada kor ku xusuan ee dalka ugu baaqeysaa in ay ka taxadaraan khataraha ka dhalan kara dabeeylahaas

Xarunta Qaran ee Ka digista Halis-wadareedka (NMHEWC) waxay si gaar ah uga digeysaa dhammaan bulshooyinka kala duwan sida; kaluumeysatada iyo dadka ku dhaqan hareeraha xeebaha in ay ka digtoonaadaan khataraha ku soo wajahan dhulka xeebaha.

Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka (WG&MM) waxey ugu baaqeysaa maamulladda deegaanaddaas kor ku xusan iyo dhammaan hey'adaha gargaarka ee ka hawlgala deegaanaddaas in ay u diyaar garoobaan xaaladaan soo cusboonaatay, ayna taageero u muujiyaan bulshada ku dhaqan xeebaha iyo deeganada barriga ah.

Dabeeyluhu xilliyada Xagaaga ah hore weey u dhici jireen laakiin waxaad mooddaa sanadkan in ay ka sii xoogeysanayaan sidii hore, taasina waxay inoo muujineysaa in ay khatarta halista dabeeyshu ku soo badaneeyso dalka.

Xarunta waxey si dhaw ula socotaa xaaladda dabeysaha waxeyna idiin soo gudbineysaa waxa soo kordha iyo sida ay isu baddesho xaaladda.

DHAMMAAD

Si aad Macluamad dheeraad ah u hesho, fadlan la xiriir: Ahmed Omar, Madaxa Xiriirka iyo Xogaha guud, communications@mohadm.gov.so, Tel. +252 615578678.